**Xeerka lamb. 71**

**Dhismaha Hey'adda madaxa banaan ee bandhigga Somaliya 'Fiyeeraha'**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA**

**XOGHAYAHA GUUD**

Kadib markii la arkay sharciga 4 Nofember 1951 lamb. 1301 oo ansixiyey Heshiiska maamulida Dhulka Somaliya ee dalka Talyaaniga kaas oo siiyey awood buuxda ee fuliyeed.

Kadib markii la arkay Amarka lamb. 47 ee 22 Luulyo 1950.

Kadib markii la arkay go'aanka 20 Febarayo 1952 oo Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha iyo Beeraha Somaliya ay ku codsatay in la dhiso Hey'adda Bandhigga Somalia oo iskeed isku maamusho.

Kadib markii la arkay amarka lagu go'aamiyey kalfadhigaas.

**WUXUU XEERAYNAYAA**

**Qod. 1**

Waxaa lagu dhisay magalada Muqdisho, Rugta Ganacsiga & Warshadaha iyo Beeraha ee Somaliya, Hey'adda madax banaan oo lagu magacaabay Bandhigga Somaliya.

**Qod. 2**

Ahmiyadda Bandhiggu waa horumarinta dhaqalaha Somaliya ee addunka dhexdiisa, kor u qaadista howlaha ganacsiga, beeraha, warshadaha ee dalka, soo jiidashada malgashida dalalka dibedda si loo kordhiyo wada is dhaafsiga dhaqale ee dibedda iyo u so bandhigga suqyada, bandhigyada dhaqaale.

**Qod. 3**

Hye'adaasi madaxa banaan waxaa lagu ag dhisay Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Somaliya.

**Qod. 4**

Hey'addan madaxa banaan waxay fulin doontaa howlaha loogu tala galay iyadoo isticmaali doono qaababka ku tilmaaman xeerka ku lifaaqan dekreetada oo ay ka mid tahay.

Muqdisho, 7 Maay 1952.

Xoghayaha Guud

**Canino**

---

**XEER HEY'ADDA MADAXA BANAAN EE BANDHIGGA SOMALIYA 'FIYEERAHA'**

**Qod. 1**

Waxaa laga ag dhisay Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Somaliya, hey'adda madaxa banaan ee lagu magacdaray 'Bandhigga-Fiyeera' Somaliya.

**Qod. 2**

Ahmiyada Hey'addu waa in aa dhaqaalaha dalka Somaliya u muujiso dhaqaalaha addunka, in ay horumariso kordhinta.

Howlaha ganacsiga, beeraha, warshadaha ee dalka, in ay soo jiidato iskashiga dowladaha dibedda si loo hormariyo wadashaqeynta dhaqaale, sidaas awgeedna ay abaabusho bandhigyo, suqyada iyo wixii kale oo sare u qaadi kara adeegyadasi.

**Qod. 3**

Hey'addani madaxa banaan waxaa lagu ag dhisay Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Somaliya.

**Qod. 4**

Hantida Hey'ada waxay ka kooban tahay:

a) Tabaruca Hey'adaha horumarineysa;
b) Tabaruca dheerad ah ee Hey'adda sida ku qoran amarka lamb 4 ee 28 Maarso 1952;
c) Tabaruca gaarka iyo kuwa ka yimaada dad kale oo seddaxad;
d) Tabaruca meel kala duwan ka yimaado.

**Qod. 5**

Maamulka Hey'adda waxaa lagu wadi doona hantida Hey'adda iyo daqliga howlaha ay fuliso.

**Qod. 6**

Hey'adda waxaa maamuli dona Golaha Guud oo ka kooab 10 qofood oo ay soo magaabto Hey'adda hormuud u ah. Golaha Guud wuxuu cusboneysiin doona 2 sanoba xubnaha Hey'adda kuwaas oo mar kale loo magacaabi karo.

Howlaha xubnaha Guddi Guud waa kuwa mushaar la'aan ah. Golahagu wuxuu tilmaamaya qaabka howlaha Hey'adda iyo bandhigyada.

Caadi ahaan Golahagu wuxuu yeelan doona 2 kal fadhi si loo ansixiyo misaaniyada hordhaca ah iyo midda la isticmaalay, magaabista Guddiga Fulinta iyo Guddiga Kormeerayaasha.

Kal fadhiyadda aan caadi ahayn waxaa codsan karo Madaxweynaha ama codsiga Guddiga fulinta ama ilaa 5 qofood oo xubna ah.

Kal fadhiyada Golaha waxay ansax yihiin markii ay soo xaadiraan kala bar hal dheeri ee xubnahooda , kal fadhiyada dambana markii ay ugu yaraan ay 3 qofood soo xadirto.

Go'aanadu waa ansax markii tirada badan ay u codeeyaan ee inta soo xaadirtay.

Golahu wuxuu iska dhex magacaabayaa Guddomiye iyo Guddomiye ku xigeen. Guddomiyuhu wuxuu si sharci ah u metelaaya Hey'adda, markii uu maqan yahay ama uusan fursad u haynin Guddomiye ku xigeenku ayaa metelaad iska leh, haddii ay labadaba maqan yihiin metelaada waxaa iska Lataliyaha ugu da'da weyn.

Ansixidda shirarka waxaa iska leh ciddii hoggamineysa kal fadhiyadaasi, go'aanada ka soo baxa waxaa lagu qori doona qoraal uu saxiixay Guddomiyaha iyo xoghayaha.

**Qod. 7**

Maamulka caadi ah iyo howlgelinta Hey'adda waxaa iska leh Guddiga Fulinta oo xubnihiisa laga soo magacaaba gudaha iyo dibedda Guddiga.

Guddomiyha Guddiga Fulinta waxaa laga soo dooran doona xubnaha Golaha Guud.

Tirada xubnaha Guddiga Fulinta waxaa la xadiidi doona sanad walba kadib markii la ogaado baahida Bandhigga. Xubnahaasi waxay hayn doonaan xilka ilaa iyo hal sano.

**Qod. 8**

Golaha Guud waxay magacaabi doonan Agaasimaha Bandhigga oo noqonaya Agaasimaha Shaqalaha, kas oo ilaalin doono in la dhowro go'aanada Golaha iyo Guddiga Fulinta wuxuu diyarinayaa qabanqaabada iyo isku duba ridka howlaha bandhigga.

**Qod. 9**

Howlaha baarista iyo kormeerka maamulka waxaa u xilsaaran Guddi Kormeer ah oo ka kooban 3 xubin oo rasmi ah iyo kuwa dheeri ah oo sanad kasto ay magacawdo Golaha guud oo laga soo xulo shaqsiyaad ka baxsan Golaha, muddada xil hayntooda kadibna dib ayaa loo magacaabi karaa.

Guddomiya Guddiga Kormeerka waxaa magacaabi doona Walaayada.

Kal fadhiyada Golaha Guud iyo Guddiga Fulinta waxaa ka soo qeyb geli kara xubin ka socoto Guddiga Kormeerka.

**Qod. 10**

Sanad maliyeedku wuxuu ku eg yahay 31 Disember ee sanad walba.

Ilaa iyo 30 Nofember Guddiga Fulinta waa in u hor keena Golaha Guud misaaniyadda hor dhaca ah ee sanadka soo socda iyo ilaa 31 Janaayo misaaniyadda sanadkii la soo dhaafay.

Xisaabaha horay loo isticmaalay waa in ay Guddiga Kormeerka uu horay uga soo baran degay.

Wixii xisaab dheerad ah ee howlaha kala gedisan waxaa loo kala qeybin doona sida soo socota:

20% waxaa iska leh hantida guud;

50% waxaa iska leh keydka;

30% waxaa ka amar bixin doono Golaha Guud.

**Qod. 11**

Hey'addu waa la baabi'in kara ama hantideeda la yareen karaa kadib markii go'aan ay ku gaaran Golaha Guud iyo codad doonayo sidaas oo dhan ilaa 2/3 meelod xubnaha Golaha laftiisa.

Haddii ay noqoto in la baabi'iyo Golaha Guud wuxuu u celin doona tabaruuca ay ku darsatay Walaayada Talyaiga wuxuun go'aamin doona kala qeybinta hantida.